# Daraasadda GENVASC iyo Shaybaadhka Caafimaadkaaga NHS

# Cilmi barista Wadnaha

**Daraasadda GENVASC: Hide Sidaha iyo Barnaamijka Baaritaanka Caafimaadka NHS**

**Waxaa lagugu soo casuumay inaad ka qayb gasho mashruuca daraasadda ee loo yaqaan GENVESC**
**kaas oo ka socota ururinta Daraasadda Biomedical Leicester ee NIHR, oo ku taal Isbitaalka Gelnfield.**

Buug yarahan wuxuu bixinaysaa faahfaahinta mashruuca. Waxaanu doonaynaa inaad fahamto sababta aanu u qabanayno mashruucan, iyo waxa ka qayb galkeedu uu noqonayo. Fadlan na waydii hadii wax ku qoran warqadu ay kuu cadaan waydo.

## Ujeedada mashruuca

Ma dhib ayaad ku qabtaa sidii aad mari lahayd shaybaadh caafimaad oo lagu qiimaynayo khatar aad ugu jirto inuu kugu dhaco wadne xanuun, markaa la ogaado inaad khatar badan ugu jirto waxaa la bilaabo karaa talaabooyinka lagaga hortagayo. Khatarta waxaa lagu xisaabiyaa iyada oo la isku darayo macluumaadka waxyaabaha aynu ognahay inuu saamayn ku leeyihiin inaad qaado wadne xanuun sida da'da,
jinsiga, dhiikarka iyo beer subaga iyo haddii aad cabto sigaar iyo/ama macaan qabto. Waxaanu doonaynaa in qiimaayntan ay muhiim u noqoto kahortaga la bartilmaameedsaday, waanu ognahay inayna boqolkiiba boqol ahayn oo dadka qaar loo aqoonsado inay khatartoodu hooseyso ay weli xanuunka yeelan karaan. Tani waxay ku timaadaa maadaama oo ay jiraan shayo kale oo saamayn kara khatarta wadne xanuunka. Waxaanu ognanahay in xanuuno badan oo wadne xanuun ahi ay in badan ku iman karaan qoysaska qaar oo sidoo kale dhalxidu uu yahay xaalada kale oo khatar ah oo muhiim ah. Tusaale ahaan, hormarka sayniska ee dhawaan waxaa lagu ogaaday in noocyada hide sidaha caanka ah oo saamayn ku leh khatarta ee xididada wadne xanuunka iyo wadne istaaga. Shakhsi ahaan, saamaynta shay kasta wuu yar yahay, laakiin haddii uu qol wada qabo dhawr, tani waxay saamayn wayn ku yeelan kartaa khatarta wadne xanuunka. Mashruucan, waxaanu doonaynaa inaanu ku tijaabino haddii macluumaadka hide sidaha ee soo kordhay ay hormarin karto saadaasha wadne xanuunka,
sida wadne xanuunka la isku gudbiyo. Iyada oo la qaadayo muunada dhiiga munaasabka ah
iyo macluumaadka kooxda wayn ee dadka ah ee ka qayb galaya shaybaadhka wadne xanuunka iyo in la arko cida yeelanayso wadne xanuunka la isku gudbiyo iyo xanuunada kale wadnaha ah ee wakhtiga la socda, waxaanu go'aamin kartaa haddii lagu darayo macluumaadka hide sidaga, ama macluumaadka kale ee aanu ka heli karno muunada dhiiga ee aad bixisay, waxaa si kasoo wanaagsan loogu ogaan karaa marka la is barbar dhigo dadkaas iyada oo la adeegsanayo qaababka wakhtigan. Haddii ay sidaa wax noqdaan, markaa ku darida macluumaadka noocan ah waxa uu, mustaqbalka, faa'ido wayn u eekanaa shakhsi ahaan iyo shacab ahaan.

## Ka qayb galka

Hadi aad ogolaato inaad ka qayb gasho waxaa dhici doono waxyaabaha soo socda.

- Waxaa lagaa dalban doonaa inaad saxeexdo foomka ogolaanshaha ah.
- Muunad dhiiga ah oo ilaa 20 mls ah (4 malqaacadood) ayaa lagaag qaadi doonaa daraasadda. Badanaa waxaa la samayn doonaa isla arkaa dhiiga shaybaadhka shaybaadhkaaga caafimaad lagaaga qaadayo. Waxaanu sidoo kale ogolaanshaha kaaga dalbad dooaa in aanu dhigayo dhiigaaga inta soo hadha ee kasoo hadha muunada shaybaadhka caafimaadka.
- Waxaanu sidoo kale kaa qaadi doonaa waxoogaa macluumaadka caafimaadka ah ee duwaanadaada iminka ku jira.
- Mustaqbalka waxaannu geli karnaa duwaanadaada caafimaadka ilaa iyo taariikhda macluumaadka. Waxaanu u samayn doonaa taas anaka oo kugu aqoonsan doono lambarkaaga NHS.
- Iyada oo lagaa dalban doono ogolaansho gaar ah, waxaanu kula soo xidhiidhi karnaa mustaqbalka, boos ama iimeel ahaan, si aanu kuugu casuuno inaad ka qayb gasho
daraasado kale. Waxa waajib ah oo ku saaran ma jirto inaad taas ogolaato.

**Fadlan ogow** ka qayb galkaaga mashruucani waa ikhtiyaar gebi ahaanba. Adiga ayay kugu xidhan tahay inaad go'aansato inaad ka qayb gasho. Go'aankaagu ma saamayn doono daryeelkaaga, baadhitaanada ama daawyanta aad u hesho si kasta oo kale.

Sidoo kale, si loogu ogolaado wakhti dheeraad ah oo lagu eegayo ka qayb galkaaga, mari maysid wax shaybaadh ah oo muunadaada ah
taas oo aad ku bixin doonto 30 maalnood. Haddii wakhti kamid ah mudadan (ama inta ka danbaysa) aad doonto inaad ka baxdo daraasaddan waxaan la xidhiidhi kartaa NIHR Leicester BRC ama waxaad soo celin doontaa foomka ka noqoshada ee lagu siiyay.

# Sirta iyo isticmaalka **muunadaha** iyo macluumaadka

Ka qayb galkaaga mashruucan waxa uu ahaan doonaa sir. Waxaa lagugu qori doonaa lambar gaar ah oo daraasadda ah, kaas oo loo adeegsan doono in lagu calaamadiyo macluumaadkaaga iyo muunadaha. Mar wax daraasad ahi isticmaalayso macluumaadkaaga ama muunadaada waxaa kaliya daraasadda loogu aqoonsan doonaa lambarka daraasadda. Tani waxay ilaalin doontaa haybtaada.

Macluumaadkaaga waxaa lagu kaydin doonaa kayd macluumaadka ah oo daraasadda gaar loogu dhisay oo ku yaal Xarunta Daraasadda Biomedical Leicester ee NIHR .

Muunadaada waxaa lagu kaydin doonnaa xarun amaan ah oo ku taal Xarunta Daraasadda Biomedical. Waxaa loo adeegsan doonaa daraasadda wadne xanuunka mustaqbalka. Waxaanu ka saari doonaa DNA-gaaga qayb kamid ah dhiiga
aad u bixisay in laga baadho hide sidahaaga. Waxaa la xaqiijin doonaa sirtaada macluumaadka caafimaadka ee adiga lagaa hayo loo bixin, baahiyo ama lasoo bandhigo qaab adiga lagugu aqoonsanayo.

Shaqaalaha maamulka mashruuca waxay isticmaali doonaan lambarkaaga NHS ee isha macluumaadka ee duwaanadaada caafimaadka ( iminka iyo mustaqbalka) oo waxaanu kugu soo casuumi doonaa inaad ka qayb gasho mashaariicda mustaqbalka (haddii aad ogolaatay in lagula soo xidhiidho).

Daraasadda wuu baadhi karaa ama hanti dhawri karaa kafaale qaadaha Daraasadda ama Dawlada Ingiriiska si loo xaqiijiyo in loo sameeyay qaabkii saxda ahaa. Baadhaha ama hantidhawruhu waxa uu geli karaa duwaankaaga haddii uu la xidhiidho daraasadda iyo in kale.

# **Dheefta** daraasadda

Ujeedada daraasadi waa in lagu hormariyo sadaashada wadne xanuunka. Ma dhigi doono shakhsi ahaan natiijooyinka waxbaaha lagu ogaado shaqada joogtada ah ee daraasadda. Tani waxaa loo sameeyaa maadaama oo ay xidhiidh la leedahay caafimaadka qaar kamid ah macluumaadka kasoo baxay daraasadda taas oo qaadan karta sanado si loo baahiyo oo u baahan cadayn dheeraad ah. Haddii aanay daraasadeenu badalin nidaamka caafimaadka, markaa wixii shaybaadho ah ama khatar ah waxaa ay sii shaqayn doonaan ilaa inta lagu jiro qiimaynta munaasabka ah ee NHS oo ahn.

Markaa waxay u badan tahay in adigu shakhsi ahaaneed si toos ah aanad u dheefsan mashruucan laakiin macluumaadka aanu ka helno mashruucan waxaa uu naga caawin doonaa inaanu hormar ku samayno sidii loo hormarin lahaa daryeelka caafimaadka dadka khatarta ugu jira wadne xanuunka.

Haddii ay kaa dalbadaan shirkada caymisku haddii aad martay shaybaadh hide side ah, waa inaad u sheegtaa in aad ikhtiyaar ku siisay muunad daraaasad ujeedadan ah
oo ay kamid tahay daraasad hide side, laakiin aanad haynin wax macluumaadka natiijooyinka ah.

# **Khatarta** waxyeelada mashruuca

Mashruucka kuma taxaluuqo wax daawayn ah, gaar ahaan baadhitaanka, ama isbadala wixii daryeelka caafimaad ee aad qiimaysay. Markaa ka qayb galkaaga mashruuca waxay u badan tahay inaanu keenin wax waxyeelo ah. Muunadaha dhiiga ee dheeraadka ah ee lagaa qaaday waxay keeni karaan marka lagugu mudayo damqashada yar ee irbada jidhka galaysa iyo nabur yar.

Wixii xaalado aan iminka la saadaalin karin ee aad u aragto inaad ku waxyeelawday, ma jiraan wax magdhaw gaar ah oo loo diyaariyay. Haddii aad ku waxyeelawday dayacaada qof, markaa waxad yeelan akrtaa talaabo sharci oo aad qaado laakiin anaku ma bixinayso. Iyada oo aan la eegeynin tan, haddii aad doonayso inaad cabasho gudbiso, ama aad qabto wax walaac ah oo dhibac walba ah ee qaabka laguu soo wajahay
ama laguua dhaqmay intii daraasaddan soocotay, waxaa kuu diyaar ah qaabka cabashooyinka NHS ee caadiga ah. Mashruucan waxaa nadqiyay Gudida Anshaxa Daraasadda si loo xaqiijiyo in xuquuqdaada iyo badqadkaaga la ilaaliyay.

# Mushkilado, cabashooyin iyo ka bax **mashruuca ah**

Haddii aad qabto wax walaacyo ah waxaa kala xidhiidhi kartaa kooxda daraasadda 0116 258 3385, ama wixii talo madax banaan ah waxaad kala xidhiidhi kartaa Isbitaalada Jaamacada Leicerster Adeega La Shaqaynta iyo Macluumaadka Bukaanka ee 08081 788337.

Waxaad xor u tahay inaad ka noqoto wixii mashruuc daraasadeed ah wakhtiga aad doonto adiga oo aanu kaa kala go'aynin daryeelka aad qaadan jirtay ama xuquuqaada sharci, adiga oo ku sheegaya maamulaha Xarunta Daraasadda Biomedical Leicester ee NIHR ee cinwaankoodu ku qoran yahay xaga hore ee waraaqahan.
ama adiga oo soo celinaya foomka ka bixitaanka ee lagu siiyay. Waxaad dalban kartaa muunad iyo macluumaadka aad bixisay in la burburiyo ama inaad ogolaato in muunadaha iyo macluumaadka aad hore u bixisay lasoo wado isticmaalkooda laakiin in aad wixii intaa ka danbeeya aanad lugta la gelin.

# **Si Wadida** xidhiidhka

Waxaad ku deeqday muunado, oo waxaad ogolaatay inayin galaan macluumaadka dhamaan cilmi baadhayaashu si ay sameeyaan daraasaddan caafimaad ee muhiimka ah. Waxaanu
doonaynaa inaanu kula socodsiino daraasadda oo dhan wixii wararka joogtada ah ee NIHR Leicester BRC. Haddii aad doonayso inaad hesho wararka, fadlan kala xidhiidh maamulka 0116 258 3385.

# **Hay'ada** iyo maalgalinta mashruuca

Mashruucan waxaa maamula Xarunta Daraasadda Biomedical Leicester ee NIHR, kaas oo ay maalgaliso Hay'ada Qaran ee Daraasadda Caafimaadka taas oo qayb ka ah Waaxda Caafimaadka. Xaruntu waxay gacansaar la leedahay Jaamacada Leicester iyo Isbitaalada Jaamacada.

East Midlands - Gudida Anshaxa Daraasadda Leicester waxa ay naqdiyeen mashruucan oo waxay ka bixiyaan fikirkooda inay taageersan yihiin.
Gudida Anshaxa Daraasadu waa hay'ad madax banaan oo qiimaysa mashaariicda daraasadda NHS si loo xaqiijiyo in xuquuqdaada iyo badqadbkaaga la ilaaliyo oo khatartaha si munaasab ah loo maamulo.

Maalgalinta mashruucan waxaa bixiyay Hay'a Wadnaha Ingiriiska iyo Hay'ada Qaran ee Daraasadda Caafimaadka.

## **Macluumaad dheeraad ah**

Haddii aad doonayso inaad ka hadasho wixii macluumaad ah ee lagu siiyay ee ku jira waraaqahan ama ka qayb galkaaga, fadlan la xidhiidh:Xarunta Daraasadda Biomedical Leicester ee NIHR

Waaxda Sayniska Xanuunka Wadnaha, Sayniska Caafimaadka Wing

Glenfield Hospital, Groby Road. Leicester. LE3 9QP. UK

taleefan: 0116 204 4771/4738/4769

iimeel: genvasc@le.ac.ukwebsaytka: genvasc.uk



NHS University Hospitals of Leicester NHS Trust

UNIVERSITY OF LEICESTER

NHS
Leicester City Clinical Commissioning Group
West Leicestershire Clinical Commissioning Group
East Leicestershire and Rutland Clinical Commissioning Group

GENERAL PRACTICE ALLIANCE · DocMed Northamptonshire · 3SIXTY · LAKESIDE HEALTHCARE